Dhibaatada dhaqaale ee Giriigga

Meesha bilowgii asbuucaan rajo weyn laga qabay in la samata bixin doono dhaqaalaha, xukuumadda iyo sumcadda Griiga intaba, saaka , shacabka iyo xukuumadda Griigu, labaduba, waxay la soo waabariisteen naxdin iyo argagax. Naxdintaas iyo argagaxaas, oo hakad geliyey lacagihii deymaha iyo deeqaha isgu jirtay oo Yurub iyo Hay'adda Lacagaha Adduunku (IMF) iska kaashanayeen si ay u bari-taaraan Griigga, waxaa gundhig u ahaa qiimayn hay'ada Standard & Poor's ku samaysay daymaha lagu leeyahay Griigga. Hay'addaas oo ka mid ah hay'adaha qiimeeya sharikaadka, hay'adaha iyo waddammada waxay deymaha waddankaas lagu leeyahay kala mid dhigtay kuwa lagu leeyahay Azerbajaan, Colombiya iyo Roomaania, i.e. daymo aan rajo weyn laga qabin in la bixiyo. Qiimayntaas oo aad u hoosaysa marka loo fiiriyo Griigga (waddan leh nidaam, ka tirsan Yurub, ay ka jirto xukuummad mas'uul ah oo lala xisaabtami karo) waxay sababtay in Giriiggu si aad ah hoos ugu sii hoobto bohoshii la rabay in laga soo bixiyo.

Giriiggu, inkastoo uusan wax weyn ka ahayn dhaqaalaha Yurub (wax ka yar 2%), haddana, mar hore ayaa dhibaatada Giriiggu u dustay (siimow) Yurub iyo caalamka labadaba. Tusaale ahaan, sarifka lacagta yuroga (euro) waxay shalay soo taabatay meeshii ugu hoosasay lixidii bilood ee la soo dhaafay; sayladaha saamiyada ee Yurubna waxay shalay kaliya lumiyeen 1% - 5.3% qiimohoodii. Dharbaaxada ugu weynina waxay ku dhacday bangiyada daymaha ku leh Giriigga. Bangiyadaas oo lacago aad u fara badan deymiyey xukuumadda iyo sharikaadka waddankaas waxay cabsi weyn laga qabaa in wax dib uga soo noqon doonaan daymahaas. Tusaale ahaan, sida ay qoreen qaar ka mid ah jariidadaha Ingiriisku (fiiri The Guardian iyo Finaincial Times), bangiyada Ingiriiska oo kaliya ayaa Giriigga ku leh daymo sare u dhaafaysa £100 bilyan. Rajo xumada laga muujiyey daymahaasina waxay keentay in, qaar ka mid ah bangiyadaas qiimaha saamiyada sheerarkooda si aad ah hoos ugu dhacaan. Waxaa cabsi middaas la mid ah la seexan la hay'adaha gacanta ku haya ama horey u gatay daymaha (bonds) Giriigga. Waxaa sidoo kale dhulgariirka ku yimid dhaqaalaha Giriigga laga dareemay waddammo aad uga durugsan Yurub sida Japan iyo Hongkong. Meesha 'index'-ka saamiyada shirkadaha ee Tokiyo hoos u dhacat 2.4%, kan Hong Kong wuxuu hoos u dhacay 1.25%.

Meesha hoggaamiyayaasha Jarmalka iyo Faransiisku madax-xanuun la fariisan waayeen 24-kii saac ee la soo dhaafay, kuwa Isbayn iyo Boruqaal mar hore ayay af labadiis qayliyeen. Madax xanuunka Jarmalka iyo Faransiiska waxaa saldhig u ahaa dhowr arrimood: qiime dhac ku yimid lacagta yurub (euro); cabsi laga qabo in dhibatadu ku baahdo waddammo kale siiba Bortuqaal iyo Isbayn; khalal gala nidaamka maliyadeed ee Yurub iyo cabsi laga qabo in lacagaha Giriiggu u baahan tahay saddex laab ka badan tahay lacagahii markii hore loo qoondeeyey. Meesha markii hore loo qoondeeyey €45 bilyan, maanta waxaa la hadal hayaa in waddankaasi u baahan yahay lacag aan ka yrayn € 125 bilyan. Waxaa intaas weheliya cabsida labadaas waddan ka qabaan in dhibaatada Giriigu u geysan doonto bangiyada iyo shirkadaha waddammadaas, maaddaama labadaas waddan ku leeyihiin Giriigga daymaha ugu badan, kuna sameeyaan maalgelimaha ugu badan.

Haddii xal u helista dhibaatada Giriiggu sii daba dheeraato, waxaa sidoo kale la hubaa in uu safka soo geli doono Talyaanigu. Meesha Isbayn iyo Bortuqaal labadaba lagu leeyahay daymo fara badan, shaqa la'aantuna aad u sarayso siiba Isbayn (20%), Talyaanigu waa waddanka lagu leeyahay daymaha ugu badan Yurub. Laakiin, meesha Giriiggu la kufaa kacayo in uu iska bixiyo dulsaarka oo kaliya (€5 oo soo gasha waddanka Giriiga, € 1 waxaa lagu bixyaa dulsaarka daymaha), Talyaaniga, Isbayn iyo Bortuqaal wali waa fiican yihiin.

Si loo badbaadiyo Isbayn, Bortuqaal iyo Talyaaniga; si dhibaatada Giriigga looga mooso Yurub inteeda kale; si looga badbaado in dib loogu noqdo hoos u dhacii dhaqaalaha; waa in Giriigga la badbaadiyo. Su'aasha dhaqaalayahannada iyo hoggaamiyayaasha Yurub iyo Hay'ada Lacagaha Adduunku iswaydiinayaanna lama xiriirto in Giriigga la badbaadiyo iyo in kale ee waxay la xiriirtaa sida ugu fiican ee loo badbaadin karo. Dhowr tallo ayaa ilaa hadda la soo jeediyey:

- In la dedejiyo hawsha hadda gacanta lagu hayo ee madax furashada (bailout). Si hawshaas loo hirgeliyo waxaa loo baahanayaa laba arrimood: (a) in madax furashadu noqoto mid la rumaysan karo; iyo (b) in Giriiggu marada dhexda ku dhuuqsado oo bilaabo siduu wax uga beddeli lahaa qaab dhaqankiisa dhaqaale.
- In Giriiggu wada xaajood la galo dawladaha iyo hay'adaha daymaha ku leh (debt restructuring). Wada xaajoodkaas waxaa ka soo bixi kara in si dhaqaalaha Giriiggana loo badbaadiyo, waddammada iyo sharikaadka daymaha ku lihina wax uun u helaan in daymaha qaar laga dhaafo. In kastoo arrintaasi macquul tahay, ayna ka soo bixi karto in Giriigga loo cafiyo daymo ku dhow-dhow 50% daymaha lagu leeyahay, waxaa mustaqbalka adkaanaysa in la gato daymaha Giriigga.
- In Giriiggu ka huleelo bahweynta yuroga (euro). Si Giriiggu uga huleelo lacagaha yuurooga waxay dib ugu noqon karaa lacagtoodii hore, dabadeedna lacagta ayay qiimo jebin (devaluation) ku samayn karaan.
- In ay ku dhawaaqaan in ay kaceen (default) oo aysan iska bixin karin wax dayn ah. Haddii ay doortaan kicitaanka, waxaa ka dhalanaya khasaare ka wayn kii ka dhashay Ruusha 1998-dii iyo kii ka dhashay Argentine 2001-dii. Sidoo kale dhibaatada xooggeedu, 70%, waxay ku dhacaysaa Jarmalka iyo Faransiiska.
- Ugu danbayn, Giriiggu wuxuu wax ka beddeli karaa nidaamkiisa canshuuraha. Tusaale ahaan waxay hoos u dhigi karaan mushahaarooyinka si awoodda tartanka ee Giriigu kor ugu kacdo, waxay sidoo kale sare u qaadi karaan canshuuraha.

Inkasta oo talooyinka sare oo dhammi macquul yihiin, haddana qaarkood, sida in ay ka baxaan bahda yuurooga ama in ay falisaan, waa jar iska xoor. Sidoo kale, kaligood canshuurohooda hoos uma dhigi karaan, mushahaarka shaqaalahana ma yarayn karaan, waayo ama waxaa hoos u dhacaysa awoodda wax gadashada ama waxaa waddanka ka haajiraya dadka xirfadda leh

Arrinta kaliya ee soo haraysa waxay noqonaysaa in laced madax furasho (bailout) ah la siiyo Giriigga. Si madax furashadu u noqoto mid la rumaysan karo waa in la isticmaalin awood la mid ah awooddii Maraykanku isticmaalay kal hore, haddii kale, waxaa hubaal ah in sheekada Giriigu la mid noqon doonto middii Ruuska ee 1998-99-kii iyo Middii Mexico ee sideetamaadkii. Meesha Maraykanku markiiba soo bandhigay lacag baaxaddeeda aan wali hore loo arag (US$ 13 triliyan) oo lagu badbaadinayo bangiyada iyo sharikaadka waaweyn ee waddankaas, Ruushka waxa markii u horaysay Juun 1998-dii uu dalbaday lacag ka yar US$ 5 bilyan. Intii gorgortankii socday ayaa dhaqaalihii waddanka waxaa soo weeraray dad raba in ay ka faa'iidaystaan xilliga jaahwareerka (speculators). Maalmo guddohood lacagta Ruushku u baahan yahay waxay madaxa la dhaaftay US$ 35 bilyan.Bishii oo aan wali dhammaanna waxaa la hadal hayey US$ 100 bilyan. Nasiib darro, intii la isku maqnaa ayaa Ruushku wuxuu ku dhawaaqay in uusan bixin karin daymihii lagu lahaa (default).

Haddaba, si Giriiggu uga badbaado dhabarjabkii Ruushka, Yurubna uga badbaado in daad ka soo rogmada buuraha Giriiggu qaato, sidii jaahwareerkii dhaqaale ee Thailand uu 1997-dii u qaatay Aasia xooggeeda, waxaa muhiim ah in Yurub iyo Hay'adda Lacagaha Adduunku (IMF) muruq sheegtaan oo soo bandhigaan wax la rumaysan karo. Waxaa sidoo kale muhiim ah in aysan la sugin xaaladda inta wax kasta faraha ka baxayaan. Haddii badbaadinta la hadal hayo ama daahdo, sida tii Ruushka, ama noqoto wax aan la rumaysan karin, sida tii Mexico, waxaa hubaal ah in daad la mid ah kii Thailand ku fatihisay Aasia, in Giriigguna ku soo fatihin doono Yurub.

Saciid Cali Shire

Buuh Consulting LTD

e. saidshire@buuh.net
t. 44 (0) 7838236171
w. Www.buuh.net